

Booqoshooyinka Kaalmada

Imaanshaha Ka dib

Waxaan sameyn doonaa booqasho xaga qadka ah si aan kaagala hadalno adiga sida aad tahay iyo sida aad u aragto nolosha UK. Shirka looma diyaarinaayo si laguu imtixaamo adiga noocuu doono ha noqdee saameyn kuma yeelan doono xaaladaada ama codsi kasta oo mustaqbalkaaga ah ee Home Office. Shirarkani waxa waaye fursad si loo hubiyo adiga oo aad ku soo jeedin karto wixii dhibaatooyin ah oo aad adiga qabtid.

Yaa nahay anaga?

Reset waa hay'adda ay u magacaawday ee Home Office si ay u fuliso shirarkaan. Waxaan sidoo kale la shaqeeynaa kooxda Community Sponsorship kuwaas oo adiga ku taageera. Waxaan nahay koox yar oo shaqaalo ah oo ku baahsan UK oo dhan. Ma nihin anaga wakiilo u fadhiya Dowladda UK.

Waa imisaa inta jeer oo dhici doono shirarkaan?

Waxaan ku weydiin doonaa inaan kula hadalno ugu yaraan 2-3 bilood ka dib imaatinkaada UK. Waxaan kaa codsan doonaa inaad nala kulanto marlabaad ugu yaraan sanad-guurada ka soo wareegatay imaatinkaada UK.

Yaa lagu soo dari doonaa shirka?

Waxaan kaa codsan doonaa xubnaha dadka waawey ee qoyskaaga inay ka soo qaybgalaan. Shirka waxaa ka soo qaygali doonaa oona hogaamin doonaa Reset. Wakiil ka imaaday UK Home Office ayaa joogi doono shirka ugu horreeyo. Waxaan keeni doonaa turjumaan.

Sidee loo qaban doonaa shirka?

Waxaa loo qaban doonaa shirka muuqaal ahaan.

Imisaa ayuu qaadan doonaa shirka?

Tani waa inay qaadanin wax ka badan 60 daqiiqo.

Mala duubi doonaa shirka?

Lama duubi doono shirka. Si kastaba ha ahaatee, waxaan qaadi doonaa qoraalo inta uu socodo shirka, iyo Reset waxay tani la wadaagi doontaa Kooxda Community Sponsorship ee Home Office. Waxaan ku weydiin doonaa haddii sidoo kale kuwaan aan la wadaagi karno kooxda Community Sponsorship kuwaas oo adiga ku taageera. Tani waa go'aankaaga.

Waxa aan ku weydiin doono?

Waxaan ku weydiin doonaa sida aad u aragto nolosha UK iyo sida aad u degeyso guryayntaada, xaafadaada iyo deegaankaaga. Waxaan ku weydiin doonaa haddii aad awoodo inaad u hesho carruuta qoskaaga iskuul, iyo sidoo kale daryeelka caafimaadka iyo adeegyada kale, sida xarunta shaqada. waxaan sidoo kale ku weydiin doonaa sida ay u socdaan casharada ingiriisigaaga iyo rajadaada ku saabsan shaqada ama iskaa wax u qabso haddii ay khuseeyso.

Uma baahnid inaad sheegto wax macluumaad ah oo qarsoodi ah oo la xariira caafimaadkaaga ama dhaqaalahaaga, oo mana sheegi doono wax kasta oo aad noo sheegto oggolaanshaaga la'aantiisa illaa uu jiro mooyee waajibaad sharci ah oo nagu waajib ah inaan sidaas sameeyno.

Qaadashada nasashada

Waan oggnahay inay noqon karto mid adag ama shacuur ahaan ugu hadli karto maadooyinka qaarkooda ee nolosha iyo waaya aragnimada qoyskaaga. Haddii aad u baahan tahay inaad qaadato nasasho ama inaad joojiso shirka, fadlan noo soo sheeg. Tani gebi ahaanba way fiicaan lahayd, oo waxba noooma dhimi doonto anaga haddii aad u baahan tahay inaad sidaas sameyso.